

Caawimaada Dhaqaalaha - Xogta Kooban ee Luuqada Fudud (PLS)

Central Maine Healthcare (CMH) waxay ku dadaalaysaa inay daawayso dhammaan bukaannada u baahan daryeelka ayadoon laga eegayn xaaladooda caymiska caafimaadka ama dhaqaalaha. Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee CMH wuxuu bixiyaa daryeelka caafimaadka ee xaalada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah lana siiyo dadka u qalma, ee aan caymiska haysan iyo qoysaska aan awoodin inay dhiibaan qarashka daryeelka caafimaadka.

Adeegyada U qalma: Adeegyada xaalada degdeg ah iyo/ama kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiyaan adeeg bixiyaasha Shabakada Central Maine Healthcare ee hoos ku qoran.

Bukaannada U qalma: Bukaannada aan lahayn caymiska ee dakhligoodu ka hooseeyo 200% Xadiyada Fakhriga Federaalku u dajiyay ee hadda jira marka laga eego tirada qoyskooda ee gudbiyay Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha (ayna ku jiraan dukumiintiyada/xogta qusaysa), kuwaas oo la go'aanshay inay u qalmaan caawimaada Dhaqaalaha.

Qaybta Tirada Qoyska	CMMC, BH, Caawimaada Daryeelka bilaaska ah RH 100% (200% FPL)
1	\$30,120
2	\$40,880
3	\$51,640
4	\$62,400
5	\$73,160
6	\$83,920
7	\$94,680
8	\$105,440
Qof kasta oo dheeraad, ku dar cadadkaan.	\$10,760

Waxaa la cusboonaysiiyay **5/21/2024**

Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB): Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ee daryeelka degdega ah ama kuwa kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah lana siiyo dadka haysta caymiska caafimaadka ee daryeelkaas daboolaya. Illaa heerka ku habboon, AGB ayaa lagu go'aamin doonaa qaabka "raad-raaca" ayadoo la qaadanaayo dhammaan lacagta isbitaalku ka helay dhammaan

qorshayaasha ganacsiga iyo Medicare intii lagu jiray sanad miisaaniyadeedkii hore ee isbitaalka kadibna loo qaybinaayo tiradaan qarashaadka guud ee laga qaaday caymisyadaas ganacsi iyo

Medicare intii lagu jiray sanadkaan hore. Bukaanaada u qalma kaalmada waxay heli doonaan lacag dhimista u dhiganta ama ka badan lacag dhimista la siiyay shakhsiyadaadka caymiska ku jira. Boqolkiiba AGB hoos ku qoran waxay codsadaan gurmada kasta ama daryeelka caafimaadka lama huraanka ah ee la siiyo shakhsiga u qalma FAP ee taariikhda oggolaanshaha xeerkan.

Cusbitaalada Xubinta ka ah	Central Maine Medical Center	Rumford Hospital	Bridgton Hospital
AGB %	53.2%	57.8%	54.9%
Lacag dhimista % Loo baahan yahay	46.8%	42.2%	45.1%
Lacag dhimista % La bixiyay	50.0%	50.0%	50.0%

Waxaa la cusboonaysiiyay Juun 7, 2022

Caawimaada la bixiyo: Dakhliga qoyska ee le'eg 200% ama ka hooseeya Heerka Fakhriiga Federaalka (FPL) dadka u qalma ee dagan Maine ayaa heli doona qiimo dhimis 100% oo ku aadan baaqiyaada ayaga kusoo aada oo ka dhasha lacag ka badan cadadka Caadiyan Laga Qaado bukaannada leh caymiska. Haddii aan qof u qalmin caawimaada Dhaqaalaha, wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado dhagaysiga caddaalada ah. Isbitaalka ayaa u sheegi doona sida ay u codsanayaan dhagaysiga.

Marka dhacdo in qofku bixin waayo lacag la go'aanshay in bukaanka/damiinka bukaanku masuul ka yahay, aana la codsan caawimaada, isbitaalku waxa uu daynta u diri karaa wakaalad banaanka ah oo lacagta kasoo qaada qofka. Falka noocaas ah ayaa keeni kara in calaamad xun la saaro sumcada dayn bixinta ee bukaanka/damiinka ama lagusoo oogo dacwad sharci.

Sida loo Codsado: Xog ku saabsan caawimaada dhaqaalaha iyo codsiyada ayaa laga heli kara abarta oonleenka ah oo ah <https://www.cmhc.org/billing-and-financial-information/financial-assistance-at-cmhc>. Si aad u hesho nuqulka bilaashka ah ee xeerka caawimaada Dhaqaalaha iyo codsiga iyo caawimaad lagaa siiyo codsigaaga,, waxaad nagasoo wici kartaa (207) 795-8050, ama nagusoo booqo:

Xafiiska Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka
29 Lowell Square, 1st Level
Lewiston, ME 04240